

Barnaamijka Caawinta Danyarta Ee Shidaalka Aqalka lagu Kululeeyo Ee Kansas (LIEAP)

Waxyaabaha La iska Doonayo Si aad u Heshid Barnaamijka Caawinta Danyarta ee shidaalka aqalka lagu kululeeyo

Xilliga Arjiga

Janaayo 2010

Barnaamijka caawinta danyarta ee shidaalka aqalka (LIEAP) waa barnaamij ay maalgeliso dowladda dhexe (Federaal) oo ka caawiya qoysaska u qalma bixinta qayb ka mid ah kharashka shidaalka aqalka (sida korontada ama gaaska aqalka lagu kululeeyo) ayadoo laga bixinayo **lacag sanadkiiba hal mar ah.**

Xilliga arjiga

Xilliga arjiga ee 2010 waa Janaayo 19 ilaa Maarso 31, 2010.

[HALKAN RIIX SI AAD U HESHID ARJI LA DAABACAN KARO \(PDF\)](#)

Warbixinta soo socota waxay qeexaysaa waxyaabaha aasaasiga ah ee aad ku mutaysanaysid inaad ka qaybgashid barnaamijka. Warbixin dheeraad ah waxaa laga heli karaa adigoo la xariira xafiiska kuugu dhaw ee Adeegyada Bulshada iyo Dib U Dhiska (SRS) saddexda bilood ee uu arjiga furan yahay.

Dadka xaqa u leh

Si aad u mutaysatid, codsadeyaashu waa inay ka soo baxaan shuruudahan:

- 1) qof weyn oo cinwaanka degan waa inuu mas'uul ka yahay bixinta kharashka kuleylka ee lagu isticmaalay aqalka uu degan yahay, kharashkaas oo uu siinayo qofka aqalka leh ama shirkadda shidaalka ama korontada.
- 2) Codsadeyaashu waa inay muujiyaan lacag bixin dhow oo cadaynaysa inay bixin jireen kharashka kuleylka aqalka.
- 3) Isu geynta dakhliga guud (intaan waxba laga goynin) ee dhamaan dadka ku nool aqalku waa inaysan dhaafin %130 oo ah heerka qaranka ee faqiirnimada ayadoo la raacayo tasmada hoose.

Tirada dadka aqalka ku nool	Dakhliga ugu badan ee la ogolyahay bishii
1.	\$ 1,174
2.	\$ 1,579
3.	\$ 1,984
4.	\$ 2,389
5.	\$ 2,794
6.	\$ 3,200
7.	\$ 3,605
8.	\$ 4,010
9.	\$ 4,416
10.	\$ 4,822
11.	\$ 5,228
12.	\$ 5,634
+	Ku dar \$406 halkii qof ee dheeraad ahba

Inta laguu ogolyahay

Qofba qofka kale wuu ka duwan yahay heerka shidaalka aqalka lacagtiisa ee laga bixinayo ayadoo ay ugu wacan yihiin arrimahan soo socda:

- 1) Dakhliga qoyska, 2) inta qof ee ku nool cinwaanka ama aqalka, 3) nooca degaanka, 4) nooca shidaalka kuleylka (Koronta ama Gaas), iyo 5) qiimaha korontada ama gaaska

Haddi aad u baahantahay war dheeraad ah ama si aad u codsatid arji, fadlan wac

1-800-432-0043